# Raadraacida Xiriirka

# Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo

### Waa maxay Raadraacida Xiriirka?

Kentucky waxay hirgalinaysaa Barnaamijka Raadraacida Xiriirka si gacan looga geysto joojinta faafitaanka cudurada sida COVID-19 iyo si gacan looga geysto in dadka reer Kentucky ay ahaadaan ku caafimaad iyo amaan qaba. Raadraacida Xiriirka waa furaha si nabadgelyo leh ugu noqoshada shaqada iyadoo sidoo kale dib loo kobcinayo dhaqaalaha.

- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha waxay la xiriiraan shakhsiyaadka qaba COVID-19 si ay u qiimeeyaan xaaladooda, ay u bixiyaan kheyraad/macluumaad wax ku ool ah, oo ay wax uga weydiiyaan xiriir kasta oo dhawaantan la yeesheen qof laga yaabo inuu cudurkaasi ku dhacay. Tilmaamo ayaa la bixiyaa oo ku saabsan sida loo joojiyo faafitaanka cudurka iyo waxa la sameeyo illaa ay ka soo kabtaan.
- Dadka u dhowaansho lala yeeshay ayaa la ogeysiinayaa in laga yaabo inay qaadeen cudurka COVID-19 waxaana la siinayaa tilmaamo waxaana lagu xiriirinayaa kheyraadka deegaanka.
- Shakhsiyaadka waxay helayaan wicitaanno dabagal ah si loo ogaado sida ay wax u socdaan iyo si loo uruuriyo wixii macluumaad ah oo cusub.
- Iyadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiyaan shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha, xiriirada waxay gacan ka geysanayaan joojinta faafitaanka COVID-19 iyo badbaadinta nolosha dadka reer Kentucky.

Tani waa qayb ka mid ah hanaan jira oo ay isticmaasho Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Kentucky (KDPH) iyo waaxaha caafimaadka ee deegaanka. Ujeeddada Raadraacida Xiriirada ayaa ah in la yareeyo khatarta caafimaad ee gaari karta dadka kale iyo in bulshooyinka laga ilaaliyo cudur qaadis dheeraad ah. Kheyraad ayaa la hayaa si loogu caawiyo qofka qaba COVID-19, iyo sidoo kale shakhsiyaadka laga yaabo inuu soo gaarey COVID-19. Dhammaan macluumaadka ay soo aruuriyaan shaqaalaha Caafimaadka Dadweynuhu waa mid qarsoodi ah lamana shaaciyo ama lalama wadaago dadweynaha.

Laga bilaabo: 8/10/2020

## Maxaa aniga la ii weydiinayaa macluumaadkayga?

Iyadoo la raacayo hagista laga helo Aqalka Cad, khubarada caafimaadka ee heer federaal iyo heer gobol, iyo gudoomiyaasha kala jooga wadanka, Waaxda Kentucky ee Caafimaadka Dadweynaha iyo Waaxaha Caafimaadka ee Deegaankaaga waxay sameyn doonaan Raadraacida Xiriirka ee COVID-19. Si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada bulshooyinkeena, waxaa laga yaabaa in lagula soo xiriiro si looga hadlo khatarta aad ugu jirto qaadista cudurka COVID-19 waxaana lagu siinayaa tilmaamo lagu yareeynayo faafitaanka fayraska.

## Macluumaadka aan bixiyo ma yahay mid qarsoodi ah?

Haa, macluumaadka aad bixiso si qarsoodi ah oo gaar ah ayaa loo xafidayaa. Macluumaadka ku saabsan shakhsiyaadka laga soo baaray oo laga helay COVID-19 iyo dadka ay u dhowaansho/xiriir la sameeyeen lama shaacin doono, dadweynahana lalama wadaagi doono.

## Sidee waaxda caafimadka u heshay macluumaadkeyga?

Adeeg-bixiyaasha daryeelka caafimaadka waxaa looga baahan yahay inay qof kasta oo la baaray oo laga helay COVID-19, ama qof aad loogu malaynaayo inuu qabo COVID-19, inay u gudbiyaan waaxda caafimaadka deegaanka.

Haddii aad dhowaan xiriir la sameysay qof qaba COVID-19, macluumaadkaaga waxaan ka helnay iyaga. Waxay kuu aqoonsadeen in lagu qaadsiiyey ama goob aad joogtay oo laga yaabo in cudurka COVID-19 ku dhacay.

## Waa maxay sababta ay iila soo xiriirayaan Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Kentucky (KDPH) ama waaxda Caafimaadka Deegaanka (LHD)?

Waxaa jira laba sababood oo lagaa yaabo in laguula soo xiriiro: Waxaad qabtaa COVID-19 ama waxaad dhowaan ag joogtay qof qaba COVID-19 waxaana laga yaabaa inaad cudurka qaaday.

Haddii aad qabto COVID-19:

- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku waydiin doona xaalkaaga isla markaana wuxuu hubin doonaa haddii ay jiraan wax aad u baahan tahay si laguugu xidhiidhiyo kheyraadka.

- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa kuu sharixi doona waxa ay tahay in la sameeyo maadaama aad hadda qabto COVID-19.
- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku weydiin doona liiska dadka aad dhowaan la joogtey/u dhowaatay, si dadkaas loo ogeysiiyo inay qabi karaan/la qaadsiiyey COVID-19. Macluumaadkaaga si buuxda ayaa qarsoodi loogu dhigi doonaa.

Haddii aad tahay qof laga yaabo inuu soo gaadhay cudurka:

- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa kuu sheegi doona in ay suurtagal tahay in lagu qaadsiiyey COVID-19.
- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku waydiin doona xaalkaaga iyo sida aad dareemayso isla markaana wuxuu hubin doonaa haddii ay jiraan wax aad u baahan tahay si laguugu xidhiidhiyo kheyraadka.
- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa go'aamin doona tallaabooyinka xigga ee la qaadayo iyadoo lagu saleynayo astaamo kasto ee laga yaabo inaad qabto.

Ujeedada Raadraacida Xiriirinta ayaa ah in la joojiyo faafitaanka COVID-19 ee bulshada dhaxdeeda iyo in la badbaadiyo nolosha dadka reer Kentucky. Iyadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiyaan shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha, waxaad gacan ka geysan kartaa inaad kuwa aad jeceshahay iyo dadka aad taqaano ka ilaaliso inay xanuunsadaan.

## Maxaan ka faa'idayaa inaan bixiyo macluumaadkeyga?

Waxaa jira faa'iidooyin badan. Waxaa ka mid ah:

- Gacan ka geysashada joojinta faafitaanka COVID-19 si uusan u gaarin dadka aad jeceshahay iyo bulshadaada.
- Helitaanka agabyada/kheyraadka aad u baahan karto inta lagu jiro muddadan oo ay ka mid yihiin:
    - Sida la isku baaro, iyo halka la isku baaro.
    - Waxa la sameeyo haddii aad qabto COVID-19.
- Inaad jawaabo ka hesho shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha.

Laga bilaabo: 8/10/2020

### Maxaa laga yeelayaa macluumaadka aan bixiyo?

Macluumaadkaaga waxaa loo hayn doonaa gebi ahaanba qarsoodi waxaana loo isticmaali doonaa oo keliya ujeeddooyinka caafimaadka dadweynaha. Macluumaadka qarsoodiga ah uma shaacino dadweynaha.

Haddii aad tahay qof qaba COVID-19, dadka kasta aad magacowdo oo aad u aqoonsato inay xiriir/u dhowaansho kula yeesheen looma sheegi doono cidda qaadsiisey cudurka. Tani macnaheedu waa inaan macluumaadkaaga ku ilaalinayno qarsoodi.

Haddii aad tahay xiriir:

- Ma jiro wax aad tiraahdo oo loo sheegi doono qofka qaba COVID-19.
- Macluumaadkaaga shakhsiyeed lama shaacin doono.
- Astaamahaaga iyo xaaladda cudurkaaga waxaa loo istcimaali doonaa in lagu xaqiijiyo inaad fiicnaato, iyo in cudurka uusan sii faafin.

### Haddii iskuuladu u furan yihiin fasalada shaqsiyeed xilliga deyrta, Raadraacida Xiriirka maxay uga dhigan tahay ardeyda laga baaray oo laga helay COVID-19 oo suurtagal ah inuu u dhowaansho la sameeyey shakhsiyaad 100+ ah?

Tilmaamaha iyo hagidda dheeraadka ah waxay ku xiran yihiin u dhowaanshaha iyo muddada uu la qaatay ardayga laga helay COVID-19. Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa la xiriiri doonaa ardayga, ama waalidka ama mas'uulka ardayga laga helay cudurka, iyo Dadka Raadraacayaasha ahna waxay la xiriiri doonaan dadka suurtagalka ah ee gaaray cudurka iyagoo siinaya hagid iyo tallaabooyinka xigga.

### Maadaama aan nahay ganacsi muhiim ah, waxaan ku tiirsannahay dadaalada Raadraacida Xiriirka. Miyaan sii wadaynaa inaan ogeysiino oo aan karantiil gelino shaqaalahayaga?

Maya, Waaxaha Caafimaadka Deegaanka (LHDs) waxay heli doonaan ogeysiis ah in qof la baaray laga helay COVID-19, taas oo bilaabi doonta geedi-socodka Raadraacida Xiriirka. Bukaankaas ayaa markaa kadib la shaqeyn doona shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha si loo aqoonsado dhammaan xiriirada suurtagalka

ah/dadka laga yaabo in la qaadsiiyey cudurka. Xiriiriyayaashan ayaa markaa waxaa la xiriiri doona Kooxda Raadraacida Xiriirka waxaana la siinayaa hagid iyo tillaabooyinka xigga.

Si kastaba ha noqotee, dhammaanteen waxaa mas'uuliyad inaga saaran inaan gacan ka geysano sidii loo maareyn lahaa arrintan, adigana waxaa mas'uuliyad kaa saaran inaad qaaddo taxaddarrada aad dareemayso inaad u baahan tahay si aad naftaada iyo kuwa aad jeceshahay u badbaadiso.

**Hadda maadaama ganacsiyada tafaariiqda iyo makhaayadaha ay furan yihiin, sidee ayay Qeybta Raadraacida Xiriirka u oggaan doonaan haddii macaamiisha ganacsiga ay cudurka qaadeen?**

Haddii qof laga helay COVID-19 uu soo sheego inuu booqday makhaayad iyo/ama ganacsi tafaariiqle ah 14-kii maalmood ee la soo dhaafay tan iyo markii laga helay cudurka, maqaayadda iyo/ama ganacsiga tafaariiqlaha ah waxay heli doonaan ogeysiis ah in laga yaabo in qof qaba COVID-19 uu ku jiro dhismahooda. Tilmaamo dheeri ah iyo tillaabooyinka xiga ayaa waxaa bixin doona Qeybta Raadraacida Xiriirka.

**Sidee dadku u codsan karaan inay noqdaan Raadraacaha Xiriirka?**

Lifaaq/linki ayaa laga heli karaa websaydka kycovid19.ky.gov, kaasoo qofku ka codsan karo.

**Sidee Raadraacida Xiriirka ay u saameyn doontaa xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha safka hore ku jira?**

Xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo shaqaalaha safka hore ku jira waxaa la marsiin doonaa geedi-socod la mid ah kuwa ay maraan dhammaan shakhsiyaadka kaqeybgalaya Geedi-socodka Raadraacida Xiriirka.

**Waaxaha Caafimaadka Deegaanka maku shaacin doonaan macluumaadkan boggagooda warbaahinta bulshada?**

Haa, waxaan si dhow ula shaqeyneynaa LHDs si aan u dhiirigelino qeybinta agabyada. Intaa waxaa sii dheer, agabyada waxaa laga heli karaa si looga soo degsado kycovid19.ky.gov.

**Sidee loo keydiyaa loona xafidaa macluumaadka shakhsiyadeed ee dadka lala xiriirey ee la weydiiyey inay ka jawaabaan su'aalo?**

Dhammaan macluumaadka la soo ururiyey waxaa lagu keydiyaa keyd xogeed oo lagu sugey amni dhowr nooc ah waxaana kaliya heli kara dadka gacmaha ku la jira hawlaha caafimaad ee dadweynaha. Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha iyo Raadraacayaasha Xiriirka ayaa si taxaddar leh loo baaraa waxayna u hoggaansan yihiin heshiisyada qarsoodiga macluumaadka.

**Waxaa jira dhowr taatiko oo dadka warbaahinta bulshada looga cabsi gelinayo Raadraacida Xiriirka. Ma jiraan wax ka run ah taatikooyinkaas?**

Raadraacida Xiriirka waa kheyraadka dadweynaha kaas oo sugan qarsoodina ah. Raadraacida Xiriirka waxaa loogu talagalay in lagu isticmaalo caafimaadka dadweynaha oo keliya. Baarayaasha Cudurada iyo La Raadraacayaasha Xiriirku waa dad u dooda caafimaadka iyo nabadgeliyada dhamaan dadka reer Kentucky. Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Kentucky waxay u shaqeysaa si daacadnimo ah si loo xaqiijiyo in macluumaadkaaga marwalba loo xafido si gaar ah oo qarsoodi ah.

**Xiriirada ma lagula talinayaa inay baaritaan isku sameeyaan?**

Xiriirrada waxaa lagula talinayaa in la baaro haddii la qaadsiiyey iyo/ama ay qabaan astaamo.

**Xiriirada ma la siin doonaa caawimaad si ay u helaan goob lagu baaro?**

Haa, macluumaadka goobaha deegaanka ee la isku baaro ayaa la siin doonaa qofka xiriirka ah waxaana siin doona Raadraacaha la hadlayo. Macluumaadkaan waxaa sidoo kale laga heli karaa websaydhka kycovid19.ky.gov.

Laga bilaabo: 8/10/2020

### Kawaran hadii Qofka raadraacaha Xiriirka ah uu i weydiiyo lambarkayga soshal sekuuritiga, baaswaadh, iyo/ama macluumaadka bangiga?

Haddii uu kula soo xiriiro Raadraacaha Xiriirka, waxaa lagu weydiin doonaa magacaaga, taariikhda dhalashadaada, iyo macluumaadkaaga caafimaad. Haddii aad heshid wicitaan ama farriin lagugu weydiinayo macluumaadka bangiga ama macluumaad gaar ah, fadlan ha ka jawaabin oo u soo sheeg Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud adigoo isticmaalaya **1-800-804-7556.**

### Xiriirrada/dadka suurtagalka ah inay qaadeen cudurka miyaa lagu amrayaa inay galaan karantiil ama kaliya waxaa lala soconayaa astaamahooda?

Qofka Raadraacaha Xiriirka ah ayaa gacan ka geysan doona qiimeynta heerka khatarta ee qof Xiriirka ah uu ku sugan yahay iyadoo lagu salaynayo dhererka waqtiga iyo u-dhawaanshaha qaadista COVID-19 kadibna waxaa la siin doonaa tilmaamo ku aadan tillaabooyinka xiga ee la qaadayo.

### Sidee Raadraaca Xiriirka loo maareynaa haddii ay jirto shuruud sharciyeed iyo anshaxeed oo ah in la ilaaliyo qarsoodiga?

Kiisaska togan/dadka qaba cudurka waxaa si otomaatik ah loogu wargaliyaa waaxaha Caafimaadka ee Deegaanka. Xeerarka HIPAA ayaa wali shaqeynaya, wax walboo ilaalin ah ayaa la sameeyey si loo difaaco qarsoodiga kiisaska togan/dadka qaba cudurka iyo dadka ay u dhowaansho la sameeyeen.

### Ma jiraan tilmaamo muujinaya sida ugu dhakhsaha badan ee loola xiriiro qofka haddii laga baaro oo laga helo cudurka?

Mar alla markii baaritaanka uu noqdo mid togan, adeeg-bixiyaha daryeelka caafimaadka waa inuu soo gudbiyaa kiiska togan. Ujeeddada baaritaanka cudurka waa in si dhakhso leh loo bilaabaa raadinta xiriirada/dadka uu u dhowaaday qofka laga baaray oo laga helay cudurka COVDI-19 si loo ogeysiiyo 24 saac gudahood.